IIB MAGALO

# FAAFIN RASMI AH

الجمهورية الصومالية

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Sannadka 16aad Muqdisho 28ka Agoosto 1988 L. 2 R 8

**Laanta Faafinta Rasmiga** ee **Madaxtooyada** J. D. **Soomaaliya**
**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

QIIMUHU: **waa** 5 **shilin lambar** wajiba — RUKUNKA: **Sanadii waa** Sh. 100 **Soomaaliya guddaheeda** — dibaddeedana **waa** Shs. **300**. Rukunka 1 **aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa** 1 **Jannaayo. Qiimaha** qoritaanku **F.R.** hajkii **sadar** iyo **waxii ka yar waa 2** Sh. — Rukunka iyo qoritaanku **waxa** la weydiinayaa **Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah** — Lacagta **waxaa lagu** bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda **Lacagta.**

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Jannaayo 1988

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER-SHARCI L. 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax ka beddelidda Sharci lam. 5 ee 5.11.66, Canshuurta Toosan. Bog; 620

XEER-SHARCI L. 5 1 Agoosto 1988, Canshuurta dhoofidda (tax departure). » 622

XEER-SHARCI L. 6 ee 1 Agoosto 1988, Bankiyada gaarka ah ee Dalka JDS. » 624

XEER WASAARADDA K. IYO GAADIIDKA BADDA L. 17 ee 28.6.88, Dhismo iyo dayactir Jid. » 626

QAYBTA LABAAD
XEER

Xeer Sharci lambar 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax ka beddelidda Sharci lambar 5 ee 5.11.1966: Canshuurta Toosan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966 oo ku saabsan canshuurta toosan;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in la nidaamiyo uruurinta canshuurta macaashka beeraha;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad
Cidda ay canshuurtu ku waajibtay

Laga billaabo dhaqan galka Xeer-sharcigan, canshuurta macaash macaashka ee laga helo qudaarta ay Somalfruit u dhoofiso dibedda ama ay ku iibiso Dalka gudihiisa waxaa bixineysa Somalfruit, waxayna ka reebeysaa beeraleyda mar walba oo ay siineyso qiimaha qudaarta, iyadoo loo raacayo nidaamka uu jideynayo Qod. 31aad ee Sharciga canshuuraha toosan (Sharci lambar 5 ee 5.11.1966).

Qod. 2aad
Boqolleyda canshuurta

Boqolleyda canshuurta ku xusan Qod. 1aad waxay noqoneysaa 7% ee dakhliga guud ee beeraley kastaa uu xaqu yeesho.

Qod. 3aad
Muddada canshuur bixinta

Canshuurta waxaa la bixinayaa bil kasta, ayadoo Xafiiska canshuuraha toosan ee Xamar lagu soo shubayo ugu dambenytii 10ka beri ee ku xigta bisha canshuurtu bislaatay.

Qod. 4aad

Uruurinta iyo ciqaabaha

Nidaamka uruurinta iyo ciqaabaha ee canshuurtan waxaa loo raacayaa Sharciga Canshuuraha Toosan (Sharci Lambar 5 ee 5.11.1966).

Qod. 5aad

Laalid qodobbo

Qodobbada kala ah 18, 19, 20, 21, 22 iyo 38 ee Sharciga Canshuuraha Toosan laguma dhaqi karo Canshuurtan.

Qod. 6aad

Dhaqangal

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 1da Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
( Maxamed Siyaad Barre )